Nidaamka Xeer-ilaaliyeyaasha Maxkamadda

Hordhac

1.1 Nidaamka Xeer-ilaaliyeyaasha Maxkamadda (xeerka) waxaa soo saaray Agaasimaha Xeer-ilaaliyeyaasha Guud (Director of Public Prosecutions (DPP)) sida ku xusan qaybta 10 Xeerka Ciqaabka Dambiyada ee 1985. Tani qaa daabacaadda toddobaad ee Nidaamka waxayna badalaysaa dhammaan daabacaadihii hore.

1.2 Agaasimaha DPP waa madaxa Adeegga Xeer-ilaalinta (Crown Prosecution Service (CPS)), taasoo ah adeegga ugu muhiimsan ee xeer-ilaalinta guud ee England iyo Wales. Agaasimaha DPP wuxuu u shaqeeyaa si madax-bannaan, isagoo hoos-tagaya Xeer-ilaaliyaha Guud kaasoo ay kala xisaabtamayaan Baarlamaanku shaqada CPS.

1.3 Nidaamku wuxuu ka siinayaa hagid xeer-ilaalinta arrimaha mabaadii'da guud ee la isticmaalayo markii la gaarayo go'aamo ku saabsan xeer-ilaalinta. Nidaamka waxaa loo soo saaray gaar ahaan xeer-ilaaliyeyaasha Adeegga Xeer-ilaalinta - CPS, laakiin xeer-ilaaliyeyaasha kale waxay u raacaan Nidaamka ama qaab la isku-waafaqay ama sababtoo ah sharciga ayaa sidaas uga baahan in la sameeyo.

1.4 Nidaamkan, erayga "laga shakisan yahay" waxaa loo isticmaalayaa sharaxaadda qof aan weli la marin nidaamka fal-dambiyeedka; erayga "is-difaace" waxaa loo isticmaalaa sharaxaadda qofka la xukumay ama xukun ku socdo; iyadoo erayga "dambiile" loo isticmaalo sharaxaadda qof u qirtay ama u qiratay fal-dambiyeed sarkaal booliiska ah ama baare kale ama xeer-ilaaliye, ama ay ku heshay dambi maxkamad sharciyeed.

Mabaadii’da Guud

2.1 Go’aanka maxakamadaynta ama kula-talinta bandhigga maxkamadayn waa tallaabo aad u daran taasoo saamaynaysa laga-shakiyeyaasha, dhibbanayaasha, marqaatiyeyaasha iyo guud ahaan dadwaynaha waana in loo sameeyaa si taxaddar sare leh.

2.2 Waa waajibaadka xeer-ilaaliyeyaasha in la xaqiijiyo in qofka saxda ah loo maxkamadeeyay fal-dambiyeedka saxda ah oo dambiilayaasha la horkeena caddaaladda meeshii kasta ee macquul ah. Go’aannada kiisaska loo gaaro si sax ah, oo aan dhinac u janjeerin oo leh qaab hufan waxay caawinaysaa sugidda caddaaladda dhibbanayaasha, marqaatiga, is-difaacayaasha iyo dadwaynaha. Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay xaqiijiyaan in sharciga sida ku haboon loo isticmaalay; in caddaymo ku haboon la horkeenay maxkamadda; iyo in waajibaadka bandhigidda xogta loo hoggaansamay.

2.3 In kasta oo ay tahay in kiis kasta loo tixgeliyo xaqiiqdiisa iyo sida ku haboon, haddana waxaa jira mabaadii’ guud oo quseeyaa kiis kasta.

2.4 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay ahaadaan caadillo, madax-bannaan oo arrinta eegaya. Waa inaysan u oggolaan in aragtiyo qofeed oo ku saabsan jinsiyad ama asalka uu ka soo jeedo, lab-dhedig, curyaannimo, da’da, diinta ama aaminaad, aragtiyo siyaasadeed, lab-dheedigood, ama aqoonsiga lab-dhedig ee laga shakiyaha, dhibbanaha ama marqaatiga ay saameeyaan go’aannadooda. Waa inaysan xeer-ilaaliyeyaasha saamaynin cadaadis aan ku haboonayn ama aan loogu talo-gelin oo ka imaanaya meel kastaba. Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay mar katsa eegaan danaha caddaaladda oo aysan kaliya eegin ujeeddada kaliya inay xukun ridaan.

2.5 CPS waa hay'ad dadwayne oo ujeeddadeedu tahay sharciga hadda jira, ku haboon ee loo siman yahay. Xeer-ilaaliyeyaasha waxaa xannibaya waaxjibaadka ku xusan sharcigan.

2.6 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay istcimaalaan mabaadii'da Shuruucda Yurub ee Xuquuqda Bani'aadmiga (European Convention on Human Rights), ee waafaqsan Xeerka Xuquuqda Bani'aadmiga 1998 (Human Rights Act 1998), ee heer kasta ee kiiska. Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay mar kasta u hoggaansamaan hagidaha uu soo saaro Xeer-ilaaliyaha Guud; ay weheliyaan Xeerarka Nidaamyada Dambiyada ee hadda jira; iyagoo tixgelinaya waajibaadka ka soo baxaya shuruucda caalamiga ah. Waa inay raacaan siyaasadaha iyo hagidaha ee CPS oo lagu soo saaro matalaadda Agaasimaha DPP oo ay dadwaynuhu ka eegan karaan bogga internet-ka ee CPS.

Go'aanka Haddii La Xukumayo

3.1 Kiisaska aadka u daran ama isugu qasan, xeer-ilaaliyeyaashu waxay go'aansadaan haddii qof lagu xukumayo fal-dambiyeed iyo, haddii ay sidaas tahay muxuu noqonayaa xukunkaas. Waxay gaarayaan go'aannadooda sida waafaqsan Nidaamkan iyo Hagiida Agaasimaha DPP ee Xukunka. Booliisku isla mabaadii'da ayuu isticmaalayaa markii uu go'aansanayo haddii la bilaabayo nidaamyada fal-dambiyeedka qof lagu qaadayo ee kiisaska ay mas'uulka ka yihiin.

3.2 Booliiska iyo baarayaasha kale waxay mas'uul ka yihiin samaynta cabashooyinka ee fal-dambiyeedka lagu soo oogay iyo go'aansashada sida loo isticmaalayo agabyadooda. Tan waxaa ku jira go'aannada

bilaabidda ama sii wadida baaritaan iyo ilaa inta uu gaarayo baaritaanku. Xeer-ilaaliyeyaashu waxay inta badan kala taliyaan booliiska iyo baarayaasha kale arrinta ku saabsan qaababka kale ee cabashada, iyo shuruudaha caddaymaha, iyo ka caawinta nidaamyada ka hor xukunka. Baaritaannada aadka u ballaaran, xeer-ilaaliyaha waxaa la waydiisan karaa talo-bixin ee guud ahaan istiraatijiyadda baaritaanka, ay ku jirto go'aanno lagu kala xulayo ama lagu soo koobayo baaritaanka dambiga iyo tirada laga shakiyeyaasha baaritaanku ku socdo. Tani waa caawinta booliiska iyo baarayaasha kale si loogu dhammaysito baaritaanka waqti macquul ah loona dhiso kiiska xukunka ugu haboon. Hase yeeshee, xeer-ilaaliyeyaashu ma hagi karaan booliiska iyo baarayaasha kale.

3.3 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay aqoonsadaan iyo, halkii macquul ah, raadiyaan meelmarinta dal-daloollada caddaymaha, laakiin, lagu eego Ku Imtixaanidda Isku-gaynta (Threshold Test) (eeg qaybta 5), waa inaan si dhaqso ah u joojiyaan kiisaska aan buuxinayn shuruudaha heerka caddaymaha ee Nidaamka Imtixaanka Buuxa (Full Code Test) (eeg qaybta 4) kuwaasoo aan lagu xoojin karin baaritaan dheeraad ah, ama halkii danaha dadwaynaha darteed ay si cad u muujinayso inaan loo baahnaun xukumid (eeg qaybta 4). In kasta oo xeer-ilaaliyeyaashu gaar ahaan tixgelinayaan caddaynta iyo macluumaadka uu keenay booliiska iyo baarayaasha kale, laga shakiyaha ama kuwa asaga ama ayada matalaya waxay sidoo kale u soo bandhigi karaan caddayn ama macluumaad xeer-ilaaliyaha, ka hor xukumidda, si looga caawiyo go'aanka xeer-ilaalinta.

3.4 Xeer-ilaaliyeyaashu waxay kaliya bilaabi karaan ama wadi karaan xukumid markii kiisku ka gudbo labada heerba ee Nidaamka Imtixaanka Buuxa (Full Code Test) (eeg qaybta 4). Ka soo reebitaanku waa markii Imtixaanka Isku-gaynta (eeg qaybta 5) la isticmaalo halkaasoo la soo jeediyay ku isticmaalidda maxkamadda si laga shakiyaha loogu hayo haynta kaddib xukunka, iyo caddaymaha loo baahan yahay in loo isticmaalo Nidaamka Imtixaanka Buuxa aysan ahayn kuwa la hayo.

3.5 Xeer-ilaaliyeyaasha ma ahan inay bilaabaan ama sii wadaan xukumid kuwaasoo ay u tixgelisay maxkamaddu caburin ahaan ama caddaalad darro iyo ku xadgudub nidaamka maxkamadaha.

3.6 Xeer-ilaaliyeyaashu dib ayay u eegayaan kiis kasta oo ay ka helaan booliiska ama baarayaasha kale. Dib-u-eegiddu waa nidaam socda iyadoo xeer-ilaaliyeyaashu ay tahay inay tixgeliyaan isbedel xaaladeed kasta ee dhaca inta kiisku socdo, ay ku jirto waxa loo yaqaan difaaca kiiska. Halkii macquul ah, waa inay la hadlaan baaraha markii lagu fikirayo arrinta ku saabsan badalaadda xukunka ama joojinta kiiska. Xeer-ilaaliyeyaasha iyo baarayaasha si aad isugu dhaw ayay u wada shaqeeyaan, laakiin mas'uuliyadda ugu dambaysa ee go'aanka haddii kiis sii soconayo ama kaleba waxay u taalaa CPS.

3.7 Baarlamaanku wuxuu go'aansaday in tiro cayiman oo fal-dambiyeedyo ah kaliya la geeyo maxkamadda oo lagula heshiiyay Agaasimaha DPP. Kuwan waxaa loogu yeeraa kiisaska oggolaanshaha. Kiisaskan oo kale, Agaasimaha DPP ama xeer-ilaaliyeyaasha matalaya asaga ama ayada waxay isticmaalayaan Nidaamka go'aansashada haddii la oggolaanayo iyo haddii kaleba xukumid. Waxaa sidoo kale jira qaar fal-dambiyeedyo kuwaas oo kaliya maxkamadda la gayn karo markii oggolaansho laga helo Xeer-ilaaliyaha Guud. Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay raacaan hagidaha hadda jira markii loo gudbinayo kiisaskan oo kale Xeer-ilaaliyaha Guud. Intaas waxaa dheer, Xeer-ilaaliyaha Guud waa lagu wargelinayaa kiiska qaarkood kuwaas oo qayb ka ah kormeerkiisa ama kormeerkeeda ee CPS iyo la xisaabtanka Baarlamaanka ee ficilladooda.

Nidaamka Imtixaanka Buuxa

4.1 Nidaamka Imtixaanka Buuxa wuxuu leeyahay laba heer: (i) heerka caddaymaha; ay ku xigto (ii) heerka danaha maslaxadd dadwaynaha.

4.2 Inta badan kiisaska, xeer-ilaaliyeyaashu waxay kaliya go'aansadaan haddii la xukumayo iyo haddii kale kaddib marka baaritaanku dhammaado iyo kaddib marka dhammaan caddaymaha la hayo dib loo eegay. Hase yeeshee waxaa jiraya kiisas halkaas oo ay caddahay, ka hor soo aruurinta iyo tixgelinta dhammaan caddaymaha jiri kara, in maslaxadaha dadwaynaha darteed aan loo baahnayn xukumid. Xaaladahan oo kale, xeer-ilaaliyeyaashu waxay go'aansan karaan inaan kiiska la sii wadin.

4.3 Xeer-ilaaliyeyaashu waxay kaliya qaadan karaan go'aan markii ay ku qancaan in fal-dambiyeed si buuxda loo sugay oo ay awoodaan inay si buuxda u sameeyaan qiimayn buuxda ee maslaxadaha dadwaynaha. Haddii xeer-ilaalayeyaashu aysan haysan macluumaad ku filan oo ay go'aankaas oo ku qaadan karaan, markaa baaritaanku waa inuu sii socdaa iyadoo go'aan lagu qaadanayo kaddib sida waafaqsan Nidaamka Imtixaanka Buuxa ee qaybtan.

Heerka Caddaymaha

4.4 Xeer-ilaalayeyaashu waa inay ku qanacsan yihiin inuu jiro caddayn ku filan si loo bixiyo xukumid macquul ah oo ku wajahan laga shakisane kasta ee xukun kasta. Waa inay tixgeliyaan waxa kiis difaac kasta uu yahay, iyo sida ay u saamayn karto xukunka macquulka ah. Kiiska aan ku gudbin heerka caddaynta ma sii socon karo, kumana xirna sida uu u daran yahay ama uu u xasaasiyad badan yahay.

4.5 Maxsuulka inuu jiro xukun macquul ah waxay ku salaysan tahay qiimaynta caddaynta ujeeddada waafaqsan ee xeer-ilaaliyaha, ay ku jirto saamaynta

wixii difaacid ah, ama wixii kasta ee macluumaad ah ee laga shakiyuhu uu soo gudbiyay ama uu ama ay ku tiirsan yahay/tahay. Macnaheedu waa in ujeeddo ku salayn, aan dhinac ahayn oo garsoor macquul ah ama koox qareenno-maxkamadeed ah ama garsoore dhagaysi kiis kaliya, si fiican loo hagay kuna dhaqmaya sida sharcigu qabo, uu u dhaw yahay inuusan xukumin is-difaacaha ee xukunka lagu oogay. Tani waa imtixaan ka duwan kan maxkamadaha dambiyada ay laftigoodu isticmaalaan. Maxakamad waxay kaliya dambi xukumi kartaa kaliya markii ay hubto in is-difaacaha uu dambiile yahay.

4.6 Markii la go'aansanayo inuu jiro caddayn ku filayn ee xukumid, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay is-waydiiyaan arrimahan soo socda:

Caddaynta ma loo isticmaali karaa maxkamadda?

Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan haddii ay jirto su'aal ku saabsan oggaanlasha macquul ahaanta qaar caddaymaha ah. Taas samaynteedana, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay qiimeeyaan:

a) macquulnimada caddayntaas oo maxkamadda u yaal sidii mid aan la oggolaan karin; iyo
b) muhiimadda caddayntaas ee la xiriirta caddaynta guud ahaan.

Caddayntu ma tahay mid la isku halayn karo?

Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan haddii ay jiraan wax sababo ah iyo haddii kale ee la isku su'aalayo hufnaanta caddaynta, ay ku jirto saxnaanta iyo hufnaanta.

Caddayntu ma tahay mid sax ah?

Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan haddii ay jiraan sababo iyo haddii kaleba ee looga shakinayo saxnaanta caddaynta.

Heerka Danaha Maslaxadaha Dadwaynaha

4.7 Kiis kasta ee ay jirto caddayn ku filan si loo sugo xukun, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay u baxaan tixgelinta haddii xukun loo baahan yahay iyo haddii kaleba marka loo fiiriyo maslaxadaha dadwaynaha.

4.8 Weligeed ma ahayn nidaam in xukun uu si otomaatiik ah u dhacayo markii la xaqiijiyo heerka caddaynta. Xukun wuu dhacayaa haddii uusan xeer-ilaaliyuhu ku qancin inay jiraan shuruudo maslaxadaha dadwaynaha ah oo ku gudban xukunka kuwaasoo ka cuslaanaya kuwa ku aadan inuu dhaco. Xaaladaha qaar xeer-ilaaliyuhu wuxuu ku qanci karaa in maslaxadaha dadwaynaha la sugi karo si ku haboon iyadoo la siinayo fursad dambiilaha uu wax uga qabanayo arrinta qaab maxkamaddu bannaan-ka-tahay halkii la xukumi lahaa.

4.9 Markii la go'aansanayo maslaxadaha dadwaynaha, xeer-ilaaliyeyaashu waa ianay tixgeliyaan su'aal kasta ee sadarrada hoose ku xusan 4.12 a) ilaa g) si la mid ahna aqoonsado sugana arrimaha quseeya ee maslaxadaha dadwaynaha ee ku gudban xumid iyo xukumid la'aanba. Arrimahaan, ay weheliyaan wixii arrimo maslaxado dadwayne ah ee lagu sheegay hagidda qusaysa ama siyaasad uu soo saaray agaasimaha DPP, waa inay u sahashaa xeer-ilaaliyeyaasha samaynta qiimayn guud ee maslaxadaha dadwaynaha.

4.10 Sheekada sharaxaadda hoose ee su'aal kasta ee sadarrada 4.12 a) ilaa g) waxay siinaysaa hagid xeer-ilaaliyeyaasha markii la wajahayo su'aal kasta gaarkeeda lana sugayo haddii ay aqoonsanayso iyo haddii kale arrimaha maslaxadaha dadwaynaha ee ku gudban xukumid iyo xukumid la'aanba. Su'aalaha la aqoonsaday ma ahan kuwa muqaddas ah, iyadoo dhammaan su'aaluhu aysan ku haboonaan karin kiiska. Miisaanka la siinayo su'aal kasta, iyo arrimaha la aqoonsaday, way kala duwanaan

karaan sidoo kale marka loo eego xaqiiqooyinka iyo ku haboonaanta kiis kasta.

4.11 Waa macquul in hal arrin ee maslaxadaha dadwaynaha ay ka miisaan wayn tahay tiro arrimo kale ah kuwaas oo ku aadanaan kara sida ka soo horjeeda. In kasta oo ay jiri karaan arrimo maslaxadaha dadwaynaha ah oo ku aadanaan kara sida ka soo horjeeda xukunka kiis gaar ah, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan haddii wax kastaba ha ahaatee iyo haddii kaleba uu xukunku dhacayo iyagoo arrimahaasna soo hordhigaya maxkamaddu inay tix-geliso markii xukunkii uu dhacay.

4.12 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan mid kasta oo arrimahan soo socda ah:

a) *Waa sidee masuuliyadda fal-dambiga la galay?*

Markii uu aad daran yahayba fal-dambiyeedku, inay aad u suurtogal tahay in xukun loo baahan yahay.

Markii la go'aansanayo heerka masuuliyadda fal-dambiyeedka la galay, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay ku daraan arrimaha kale tixgelinta heerka masuuliyadda laga shakiyaha iyo dhaawaca gaaray dhibbanaha iyagoo is-waydiinaya su'aalaha ku xusan b) iyo c).

b) Waa maxay heerka masuuliyadda laga shakiyaha?

Markii ay sii waynaato heerka masuuliyadda laga shakiyahaba, waa inay u badnaanayso in xukun loo baahdo.

Masuuliyadda waxaa lagu sugi karaa heerka ka qayb-qaadashada laga shakiyaha; ilaa heerka fal-dambiyeedka loo sameeyay iyo/ama loo qorsheeyay; haddii ay jireen xukun-dambiyo hore iyo/ama waxa horyaala maxkamad bannaan-ka-ahaanshaha kiiska iyo wixii fal-dambiyeed bannaanka looga joogay dambiin ahaan; ama hoostagayay

amar maxkamadeed; haddii fal-dambiyeedku sii socday, lagu soo celiyay ama laga yaabo inuu sii socdo; iyo da'da laga shakiyaha ama qaangaarkiisa (eeg sadarrada d hoose ee laga shakiyeyaasha ka yar da'da 18).

Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay sidoo kale eegaan markii ay tix-gelinayaan masuuliyadda in haddii laga shakiyaha ku sugnaa, ama ahaa waqtiga fal-dambiyeedka, mid la il-daran wax cudur maskaxeed daran ah ama xannuun caafimaad jismiga ah maadaama xaaladaha qaar ay tan macnaheedu noqon karo inay yar tahay in xukun loo baahdo. Hase yeeshee, xeer-ilaaliyeyaashu waxay sidoo kale tahay inay tixgeliyaan ilaa heerka uu daran yahay fal-dambiyeedku, haddii ay macquul tahay in lagu celiyo mar kale iyo baahida dhawridda dadwaynaha ama kuwa siinaya daryeel dadka noocaas oo kale ah.

c) Waa maxay jawi-xaaladeedka iyo dhaawaca loo gaystay dhibbanaha?

Xaaladdaha dhibbanaha aad ayay u quseeyaan. Markii ay sii waynaato nuglaanta dhibbanahaba, waxaa sii badanaya in xukun loo baahan yahay. Tan waxaa ku jira halka booska aaminaadda ama maamulka ka jira ee u dhexeeya laga shakisanaha iyo dhibbanaha.

Xukun sidoo kale wuxuu aad macquul u yahay haddii fal-dambiyeedka loo gaystay dhibbane kaasoo waqtigaas ah mid u adeegaya dadwaynaha.

Xeer-ilaaliyeyaasha waa inay sidoo kale eegaan haddii fal-dambiyeedka uu ahaa mid ku talo-gal ah ee qaab kasta oo cunsurinnimo loogu gaystay dhibbanaha jinsiyad ahaantiisa ama meesha uu ka soo jeedo dhalasho ahaan, lab-dhedig, curyaannimo, da'da, diinta ama aaminaad, lab-dheedigoodka ama aqoonsiga lab-dhedig; ama inuu laga shakiyaha u muujiyay cadaawad dhibbanaha taasoo ku salaysan mid ka mid ah arrimahaas. Jiritaanka mid ka mid

ah ku talagalkaan ama cadaawadaan waxay macnaheedu tahay inay aad ugu badan tahay in xukun loo baahan yahay.

Go'aansashada haddii loo baahan xukun masladaxadda dadwaynaha darteed, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan aragtiyada ay muujiyeen dhibbanaha ee ku saabsan saamaynta uu fal-dambiyeedku u gaystay. Kiisaska ay qusayso, tani waxaa ku jiri kara sidoo kale aragtiyada dhibbanaha qoyskiisa.

Xeer-ilaaliyeyaashu waxay sidoo kale u baahan yihiin tixgelinta haddii xukunku uu saamayn aan haboonayn ku yeelanayo dhibbanaha jismigiisa ama caafimaadkiisa maskaxeed, mar kastana maskaxda lagu haynayo heerka masuuliyaadda fal-dambiyeedka. Haddii ay jirto caddayn in xukunku uu ku yeelan karo saamayn aan haboonayn caafimaadka dhibbanaha waxay ka dhigi kartaa xukunka mid aan dhici karin, iyadoo xisaabta lagu darayo aragtiyada dhibbanaha.

Hase yeeshee, CPS uguma hawl-galayso dhibbanayaasha ama qoysaskooda si la mid ah qaabka qareennadu ugu hawl-galaan macaamiishooda, iyadoo xeer-ilaaliyeyaashu ay tahay inay qaabeeyaan aragtida guud ee maslaxadda dadwaynaha.

d) Ma wuxuu ka yaraa laga shakisanuhu 18 sano jir waqtiga fal-dambiyeedku dhacayay?

Nidaamka caddaaladda dambiyada wuxuu ula dhaqmaa carruurta iyo dadka dhallinyarada ah si ka duwan dadka waawayn iyadoo miisaan culus la saarayo da'da laga shakisanaha haddii ay carruur yihiin ama qofka yar uu ka yar yahay 18. Sida ugu wanaagsan iyo wanaagga ilmaha ama qofka yar waa in la tixgeliyaa ay ku jirto haddii xukun uu saamayn daran ku yeelan karo asaga ama ayada mustaqbalkeeda taasoo aan ku miisaanayn heerka masuuliyadda fal-dambiyeedka. Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay eegaan ujeeddada mabaadii'da ee nidaamka caddaaladda dhallinyarada taasoo ah ka hortagidda inay fal-

dambiyeed sameeyaan carruurta dadka dhallinyarada ah. Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay sidoo kale tixgeliyaan waajibaadyada ka imaanaya Xeerka Caalimaga ah ee Qaramada Midoobay 1989 ee Xuquuqda Ilmaha (United Nations 1989 Convention on Human Rights of the Child).

Meel laga bilaabo ahaan, markii uu laga shakisanuhu yar yahayba, inay sii yaraanayso in xukun loo baahdo.

Hase yeeshee, waxaa jira xaalado macnahoodu yahay in in kasta oo xaqiiqdii laga shakisanuhu uu ka yar yahay 18, haddana xukun uu yahay maslaxadda dadwaynaha. Kuwaan waxaa ku jira halkii fal-dambiyeedku yahay mid aad u daran, halkii laga shakisanaha diiwaankiisa hore muujinayso inaysan jirin xal kale oo aan xukun ahayn, ama halkii maqnaanshaha qirasho ay macnaheedu tahay in maxkamad la'aan xallinteed taasoo wax ka qaban lahayd qaab-dhaqanka fal-dambiyeedka aysan jirin.

e) Waa maxay saamaynta bulshada?

Markii ay wayn tahayba saamaynta fal-dambiyeedka ee bulshada, inay sii badanayso in loo baahan yahay xukun. Tixgelinta su'aashan, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay eegaan sida ay arrinta bulshadu ugu jirto xaaladda iyadoo aan ku koobnayn bulshooyinka degaan ahaan ku qeexan.

f) Xukunku ma yahay jawaab u qalanta?

Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan haddii xukunku u qalmo maxsuulka soo bixi kara, iyadoo markii sidaas la yeelo ay tan soo socota ku haboon tahay kiiska la tixgelinayo:

- Qiimaha ay ugu kacayso CPS iyo guud ahaan nidaamka caddaalada dambiyada, gaar ahaan halkii loo eegayo had-dhaaf

markii lagu miisaamo wixii ganaax macquul ah. (Xeer-ilaaliyeyaashu waa inaysan u tixgelin maslaxadaha dadwaynaha saldhigga arrintan kaliya. Waa muhiim in sidoo kale tixgelin la siiyo arrimaha maslaxadaha dadwaynaha lagu aqoonsaday markii la tixgelinayo su'aalaha kale ee sadarrada 4.12 a) ilaa g), laakiin qiimuhu waa arrin muhiim ah markii la samaynayo qiimayn guud ee maslaxadaha dadwaynaha.)

- Kiisasku waa inay ahaadaan kuwa la xukumi karo qaab waafaqsan mabaadii'da maamulka kiiska ee haboon. Tusaale ahaan, kiis quseeya laga shakiyeyaal badan, xukunka waa loo kaydin karaa ka soo qaybgalayaasha muhiimka ah si looga hortago qaab-nidaamyo si xad dhaaf ah u dheeraada oo isku qasan.

g) Meelaha macluumaadka laga helayo ma u baahan yihiin difaacid?

Kiisaskii aysan qusayn xasaanadda maslaxadaha dadwaynaha, taxadar waa in laga muujiyaa markii la raacayo xukumid halkaas oo ay tahay faahfaahinta in dadwaynaha loo soo bandhigo taasoo dhibaato u gaysan karta agabka macluumaadka, xiriirka caalamiga ah ama ammaanka qaranka. Waa muhiim in kiisaskan oo kale si joogto ah dib u eegid lagu sameeyo.

Imtixaanka Isku-gaynta

5.1 Imtixaanka Isku-gaynta waxaa kaliya la isticmaali karaa halkii laga shakisanaha uu muujiyo khatar aad u daran oo damaanadda ah iyadoo aan la hayn caddaymo waqtiga ay tahay in asaga ama ayada laga sii daayo haynta haddii aan la xukumin.

Goorta Imtixaanka Isku-gaynta la isticmaali karo

5.2 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay sugaan shuruudahan soo socda in la daboolay:

a) Waxaa hadda jira caddayn aan ku filnayn si loogu isticmaalo heerka caddaynta ee Nidaamka Imtixaanka Buuxa (Full Code Test); iyo
b) waxaa jira sababo la aamini karo ee ah in caddayntu ku imaanayso waqti macquul ah; iyo
c) heerka khatarta ama xaaladaha kiiska waxay bannaynayaan samaynta go'aan xukun degdeg ah; iyo
d) Waxaa jira sababo aad muhiim u ah oo joogto ee diididda damaanad sida waafaqsan Xeerka Damaanadda 1976 (Bail Act 1976) iyadoo xaaladda kiiska marka la eego ay ku haboon tahay in sidaas la yeelo.

5.3 Halkii shuruudaha sare aan la daboolin, Imtixaanka Isku-gaynta lama isticmaali karo lamana xukumi karo laga shakisanaha. Sarkaalka goobta haynta waa inuu go'aansadaa haddii qofka la sii haynayo ama lagu siidaynayo dammaanad, shuruudo la socdaan ama aysan la socon.

5.4 Waxaa jira laba qaybood oo ah tix-gelinta caddaynta ee Imtixaanka Isku-gaynta.

Qaybta koowaad ee Imtixaanka Isku-gaynta – ma jirtaa ka shakin macquul?

5.5 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay ku qancaan inuu jiro ugu yaraan ka shakin lagu qanci karo ee in qofka la xukumayo uu galay fal-dambiyeedka.

5.6 Sugitaanka tan, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan caddaynta markaas la hayo. Tani waxay noqon kartaa qaab warbixin marqaati, alaab ama macluumaad kale, taasoo ku xiran in xeer-ilaaliyuhu ku qancay in:

a) ay qusayso; iyo
b) ay noqon karto mid qaab la oggolaan karo loogu soo bandhigi karo maxkamadda; iyo
c) loo isticmaali karo kiiska.

5.7 haddii lagu qanco markaa xeer-ilaaliyuhu waa inuu tixgeliyaa qaybta labaad ee Imtixaanka Isku-gaynta.

Qaybta labaad ee Imtixaanka Isku-gaynta – caddayn dheeraad ah ma la soo aruurin karaa si loo helo wax macquul ah ee wax lagu xukumi karo?

5.8 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay ku qancaan inay jiraan sababo macquul ah ee lagu aaminayo in sii wadida baaritaanka ay keenayso caddayn dheeraad ah, waqti macquul ah gudihiis, si dhammaan caddaymaha la hayo ay awoodaan sugitaanka xukun macquul ah sida waafaqsan Nidaamka Imtixaanka Buuxa.

5.9 Caddaynta dheeraadka ah waa inay ahaataa mid la aqoonsan karo oo aysan ahayn kutiri kuteen.

5.10 Gaaritaanka go’aankan xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan:

a) Nooca, ilaa heerka iyo oggolaanshaheeda wixii caddayn dheeraad ah iyo saamaynta ay ku yeelanayso kiiska
b) xukunka ay dhammaan caddaymuhu taageerayaan;

c) sababaha ay caddayntu horeba ugu jiri wayday;
d) waqtiga loo baahan yahay in lagu helo caddaymo dheeraad ah iyo haddii sababo darteed daahitaan uu macquul yahay dhammaan xaladaha.

5.11 Haddii labada qaybood ee Imtixaanka Isku-gaynta la qanciyay, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay isticmaalaan heerka maslaxadaha dadwaynaha ee Nidaamka Imtixaanka Buuxa ee macluumaadka la hayo waqtigaas.

Dib-u-eegidda Imtixaanka Isku-gaynta

5.12 Go'aanka in lagu eego Imtixaanka Isku-gaynta waa in lagu hayaa dib-u-eegid joogto ah. Caddaynta waa in si joogto ah loo qiimeeyaa loo xaqiijiyo in weli xukunku ku haboon yahay iyo in diidmada joogtada ah ee damaanaddu ay tahay mid macquul ah. Nidaamka Imtixaanka Buuxa waa in la isticmaalaa sida ugu dhaqso badan ee macquul ah iyo weliba xaalad kastaba ka hor waqtiga dhicitaanka xadka la yeeli karo ee hayn kasta.

Xulashada Xukunnada

6.1 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay xushaan xukunno kuwaasoo:

a) ka tarjumaya masuuliyadda iyo ilaa heerka fal-dambiyeedka ay caawinayso caddayntu;
b) siinaya maxkamadda awoodo ku filan ee xukumid iyo dul-dhigidda amaro xukunka kaddib; iyo
c) u sahlaya in kiiska loo soo bandhigi karo si cad iyo qaab fudud.

6.2 Tani macnaheedu waa in xeer-ilaaliyeyaashu aysan mar kasta dooranayn ama sii wadayn xukunka ugu daran halkii uu jiro kala xulasho.

6.3 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inaysan ku sii socon xukun aad u daran oo ku dhiirogelinaysa in is-difaacuhu uu qirto dambiga. Qaab la mid ah, waa inaysan ku sii socon xukun aad u daran kaliya sii loogu dhiirogeliyo is-difaacaha inuu qirto dambiga mid aan aad u darnayn.

6.4 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inaysan badalin xukunka kaliya sabab la xiriirta in go'aan ay gaartay maxkamaddu ama is-difaacaha ee ku saabsan halkaas oo kiiska la dhagaysan doono.

6.5 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay xisaabta ku daraan wixii isbedel ah ee quseeya xaaladda markii uu kiisku sii socdaba kaddib xukunka.

Fursadaha Maxkamad-ka-bannaanka

7.1 Fursadaha Maxkamad-ka-bannaanka (out-of-court disposal) waxay geli karaan booska xukunka maxkamadda haddii ay tahay mid ku haboon fal-dambiilaha iyo/ama heerka masuuliyadda iyo saamaynta fal-dambiyeedka.

7.2 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay raacaan wixii hagid quseeya markii talo-bixin la waydiisto ama amraan taxadar fudud, taxadar shuruudaysan, wixii nidaamyo sharciyeed ah, ciqaab ama ganaax rayid, ama wixii kale ee fursad ah. Waa inay xaqiijiyaan in heerka caddaymaha ku haboon ee fursadaha maxkamad-ka-bannaanka la daboolay ay ku jirto, halkii loo baahan yahay, qirasho cad ee dambiga, iyo in maslaxadaha dadwaynaha la dhawray markii la siiyo fursadda.

Qaabka Maxkamadaynta

8.1 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay eegaan hagidaha hadda jira ee xukumidda iyo habaynta markii la samaynayo u gudbinta maxkamadda ee ku saabsan halka lagu maxkamadaynayo is-difaacaha.

8.2 Degdeg waa inuusan ahaan weligeed sababta kaliya ee loo waydiisanayo in kiis uu joogto maxakamadda degaanka. Laakiin xeer-ilaaliyeyaashu waa inay tixgeliyaan saamaynta wixii daahitaan macquul ah haddii kiis loo diro Maxkamadda Sare, iyo wixii saamayn macquul ah ee ku imaanaya dhibbanaha iyo marqaatiga haddii kiisku daaho.

Goobta maxkamadaynta ee kiisaska quseeya dhallinyarada

8.3 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay maanka ku hayaan in dhallinyarada ay tahay in lagu maxkamadeeyo maxkamadda dhallinyarada halkii macquul ah. Waa maxkamadda si fiican ugu haboon daboolidda baahiyahooda gaarka ah. Ku maxkamadaynta dhallinyaro Maxkamadda Sare waa in loo kaydiiyaa kiisaska aadka u daran ama halkii maslaxadda caddaaladda ay keenayso in dhallinyaro lala maxkamadeeyo qof qaangaar ah.

Aqbalaadda Dami Qirasho

9.1 Is-difaacayaashu waxay qiran karaan qaar dambiga ah, laakiin oo dhammaan ahayn, wixii lagu soo eedeeyay. Taas badalkeeda, waxay qiran karaan mid ka duwan, oo macquul ay tahay inuusan darnayn, sababtoo ah waxay qirayaan kaliya qaar dambiga ah.

9.2 Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay kaliya aqbalaan qirashada is-difaacaha haddii ay u malaynayaan in maxkamaddu ay awooddo marsiinta xukunka inuu u dhigmo heerka masuuliyadda fal-dambiyeedka, gaar ahaan markii ay jiraan saansaano aad u daran. Xeer-ilaaliyeyaashu waa inaysan waligood aqbalin qirasho dambi sabab la xiriirta inay ku haboon tahay.

9.3 Tixgelinta haddii qirashada dambi la aqbali karo, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay xaqiijiyaan in maslaxadaha, halkii macquul ah, aragtiyada dhibbanaha, ama kiisaska ku haboon aragtiyada qoyska dhibbanaha, xisaabta lagu daro markii la go'aansanayo haddii ay tahay maslaxadaha dadwaynaha in la aqbalo qirashada. Hase yeeshee, go'aanku wuxuu u yaalaa xeer-ilaaliyaha.

9.4 Waa in maxkamadda loo caddeeyaa waxa lagu salaynayo in qirasho la horumariyo oo la aqbalo. Kiisaska uu is-difaace qirto dambi lagu soo oogay laakiin ku salaysan xaqiiqooyin ka duwan kuwa xukunka kiiska, halkaas oo tani saamayn karto si aad ah xukunka kiiska, maxkamadda waxaa lagu casumayaa dhagaysiga caddaynta si lo sugo waxa dhacay, kaddib xukun ku rida sababtaas darteed.

9.5 Halkii is-difaace uu hore u muujiyay in uu ama ay waydinayo/waydiinayso in maxkamaddu tix-geliso fal-dambiyeed markii xukun la ridayo, laakiin inkiro qirashada fal-dambigaas waqtiga maxkamadda, xeer-ilaaliyeyaashu waxay tixgelinayaan haddii xukun loogu baahan yahay fal-dambiyeedkaas. Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay u sharaxaan qareenka is-difaacaha iyo

maxkamadda in xukumidda fal-dambiyeedkaas uu ahaan karo mid galaya dib-u-eegid, la tashid booliiska ama baaritaan kale halkii macquul ah.

9.6 Taxadar gaar ah waa in la yeeshaa markii la tixgelinayo qirasho taasoo u sahlaysa is-difaacaha ka wareegida dul-dhigidda xukunka ugu yar ee lagu qaadayo. Markii qirasho la oggolaado, xeer-ilaaliyeyaashu waa inay maskaxda ku hayaan in amarro la dul dhigi karo qaar fal-dambiyeed ah laakiin aan qar kale aan la duldhigi karin.

Dib-u-tixgelinta Go’an Xukun

10.1 Dadku waa inay ku tiirsanaadaan go’aanada ay qaataan CPS. Caadiyan, haddii CPS u sheegaan laga-shakisane ama is-difaace inaysan xukun lahaanayn, ama in xukunka la joojiyay, kiisku dib uma bilaabanayo. Laakiin marmar waxaa jiraya sababo ay CPS uga boodi karaan go’aan ah inaan la xukumin ama ula macaamilaan kiis qaab fursad maxkamad-ka-bannaan ah ama goorta uu kiis dib u bilaabanayo, gaar ahaan markii kiisku aad u daran yahay.

10.2 Sababaha waxaa ka mid ah:

a) kiisas markii dib loo fiiriyo go’aankii asalka ahaa ay tusinayso inay qalad ahayd iyo, si loo ilaaliyo ku kalsoonaanta nidaamka caddaaladda dambiyada, xukun waa in la ridaa xitaa go’aan horeba ha dhacee;

b) kiisas la joojiyay si caddayn dheeraad ah [taasoo laga yaabo in la helo waqti dhow] loo soo aruurin karo loona diyaarin karo. kiisaskan, xeer-ilaaliyuhu wuxuu u sheegayaa is-difaacaha in xukunku uu dib u bilaabanayo;

c) Kiisas u joogsaday caddaymo la’aan dartood laakiin mar dambe caddaymo muhiim ah la helay; iyo

d) Kiisas quseeya dhimasho taasoo dib-u-eegid ka timid maxsuullo baaritaan lagu soo gabagabeeyay in xukun dib loo bilaabo, taasoo meesha ka saaraysa wixii go’aamo hore ahaa ee inaan la xukumin.

Dokumentigaan waxaa si eloktoroon ah looga heli karaa boggayaga internet-ka ee:
www.cps.gov.uk

Nuqullo dheeraad ah ee Nidaamka Xeer-ilaaliyeyaasha Maxkamadda iyo macluumaadka ku saabsan luuqado kale iyo qaabab qoraal kale waxaa laga helayaa CPS.

Fadlan la xiriir publicity.branch@cps.gsi.gov.uk ama boosto ahaan:

CPS Communication Division
Rose Court
2 Southwark Bridge
London, SE1 9HS

The Code for Crown Prosecutors
7th Edition, January 2013
© Crown Copyright